Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Wasaaradda *Waxbarashada, Hiddaha & TacliintaSare*

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة التربية والثقافة والتعليم والعالى

Somali Federal Republic
Ministry of Education, Culture & Higher Education

Taariikh: 13/04/2019

CODSI SOO GUDBINTA DANEYNTA DAABULISTA DHANKA HAWADA AH EE SHAQAALAHA IYO WARAAQAHA IMTIXAANKA QARANKA EE SANNAD DUGSIYEEDKA 2018/2019

Horudhac

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (WWH&TS) waxay dooneysaa in ay hesho shirkad diyaaradeed daabusha Shaqaalaha iyo Waraaqaha Imtixaanka Fasalka Afraad ee Dugsiga Sare, kadibna dib ugu soo celisa magaalada Muqdisho. Sidaasi awgeed, Wasaaraddu waxay ugu baaqeysaa shirkadaha buuxin kara shuruudaha hoos ku qoran isla markaasna daneynaya shaqadan in ay ka soo qeybgalaan tartankan. Shirkadaha waxa lagu martiqaadayaa in ay soo arkaan xarunta imtixaanaadka iyo shir loogu faahfaahinayo qaabka loo soo dalbanayo shaqada, la xidhiidh examination@moe.gov.so si aad isku diiwaangeliso.

Macluumaadka shaqada

- Shaqada la qabanayo waa daabulista shaqaalaha iyo waraaqaha imtixaanka qaranka ee laga qaado sanad waliba ardayda Fasalka Afaraad ee dugsiga sare; iyada oo sanadkaan loo daabacay arday gaareysa 33,000. Goobaha la tagayo waa 15 magaalo oo dalka gudihiisa ah, tirada shaqaalaha tageya goobahaa kala duwana waa 60 shaqaale ah guud ahaan.
- Magaalooyinka la tegayo waxay kala yihiin: **Dhoobleey, Kismaayo, Garbahaareey, Baardheere, Luuq, Baydhabo, Xudur, Beledweyne, Buuloberde, Jawhar, Cadaado, Dhuusamareeb, Caabudwaaq, Guriceel iyo Gaalkacyo.**
- Waqtiga la doonayo agabka iyo shaqaalaha in la geeyo magaalooyinkaa waa **May 7, 2019** maalinta la soo celinayana waa **May 16, 2019** Inshaa Allah.
- Waraaqaha waxa Wasaaraddu ku xiri doontaa sanaadiiq bir ah, Culeyska alaabta guud ahaan waa qiyaas dhan 25,000KG oo ku jiri doonta qiyaas dhan 420 sanduuq.

Shuruudaha hordhaca ah,

Shirkadaha tartamaya waxaa laga rabaa in ay soo gudbiyaan:

1. Shahaadada Hay'adda duulista rayidka iyo saadaasha hawada ama Wasaaradda Gaadiidka iyo Saadaasha Hawada,
2. Shati ganacsi oo ansax ah (Wasaaradda Ganacsiga Federaalka/Gobolka),
3. Caddeyn canshuur bixin ka diiwaan gashan Wasaaradda Maaliyadda,
4. Dokumentiyada farsamo iyo midda qiime ee hoos ku xusan

Federal Republic of Somalia
Ministry of Education, Culture & H. Education
Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha & TacliintaSare
وزارة التربية والثقافة والتعليم العالي
جمهورية الصومال الفيدرالية